

Xirashada maaskarada iyo Daryeelka Ilmaha

(La Cusboonaysiyey 3-14-2022)

Lakabyada xeeladaha ka-hortagga ayaa sii ahaanaya habka ugu wanaagsan ee looga hortago COVID-19. Bixiyeyaasha daryeelka ilmaha waxay dooran karaan inay uga baahdaan xirashada maaskarada marka la joogo barnaamijkooda. Shaqaalaha daryeelka ilmaha iyo qoysaska waxay sidoo kale go'aansan karaan inay xirtaan maaskaro. Bixiyeyaasha daryeelka ilmaha ee ruqsada haysta waa inay raacaan Qaybta Waxbarashada Hore [“Sharuudaha iyo Tallooyinka Daryeelka Ilmaha ee COVID-19.”](#)

Qaybta Waxbarashada Hore (ELD) iyo Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) waxay taageerayan barnaamijka iyo doorashada qoyska si ay u sii wadaan xirashada maaskarada.

Maskarooyinka ayaa weli waxaa lagula talinayaa xaaladaha soo socda:

- Qof kasta oo da'diisu tahay laba sano jir iyo ka weyn oo ku soo laabanaya daryeelka ilmaha waa inuu xirto maaskaro si fiican ugu habboon shanta maalmood ee ka dambeeya muddada 5-tooda maalin ee [go'doominta](#) COVID-19.
- Inta lagu jiro xiliyada [heerka sare ee gudbinta bulshada ee COVID-19](#), xirashada maaskarada caalamiga ah ee gudaha ayaa si adag loogu talinayaa.
- Xiliga muddada ee uu dhexdhexaadka yahay [heerka gudbinta bulshada ee COVID-19](#), kuwa khatarta sare ugu jira xanuun daran ama daryeelka carruurta halista ugu jira cudurro daran waxaa lagula talinayaa inay xirtaan maaskaro. Kuwaas waxaa ka mid ah kuwa:
 - Aan la tallaalin ama aan [la jaanqaadsaneyn](#) tallaalka cusub.
 - Uu difaac jirkooda liito.
 - Qabo naafanimo
 - La nool dadka khatarta sare ku jira ama aan la tallaalin.

- Dadka leh [xaalado caafimaad oo hooseeya](#).

Xeeladaha lagu caawinayo hirgelinta hagitaanka xirashada maaskarada ee barnaamijyada daryeelka ilmaha waxaa ka mid ah:

- Siyaasad cad, qoran oo ay heli karaan shaqaalaha, qoysaska iyo soo booqdayaasha.
- Tababarka shaqaalaha ee ku saabsan siyaasada iyo sida loo baro qoysaska iyo soo booqdayaasha siyaasada.
- Dadaallada ka qaybgalka qoyska si loo kordhiyo wacyigelinta siyaasadda.
- Calaamado qayaxan oo muuqda oo ku yaalo meesha laga soo galo ilaa xarunta daryeelka ilmaha oo dhan
- Maskarooyin dheeraad ah oo la siiyo shaqaalaha, carruurta, iyo soo booqdayaasha aan haysan maaskaro.
- Borotokool qayaxan, oo qoran oo loogu talagalay Ka jawaabista cabashooyinka.

Si aad u hesho dhigaalada iyo wararka joogtada ah ee ku saabsan COVID-19, booqo [OHA](#).

Dhigaalo dheeraad ah:

- [Shuruudaha iyo tallooyinka maaskarada](#) ee Maamulka Caafimaadka Oregon
- Qalabka CDC ee “[Marka la Xirto Maaskaro ama Neef-miire](#)” ayaa ka caawin kara bixiyeyaasha inay go'aan ka gaaraan goorta iyo sida loo hirgelinayo hannaanka lakabaysan ee ku salaysan gudbinta bulshada ee COVID-19 ee [heerka degmada](#).
- Qaybta Waxbarashada Hore [Dhigaalada COVID-19](#)
- Hagitaanka faahfaahsan ee [CDC ee COVID-19 ee loogu talagalay barnaamijyada daryeelka ilmaha](#)
- Qaado [baaritaanka COVID-19 test](#) ama [tallaalka](#)
- Khadka caawimaada ee Maamulka Caafimaadka Oregon [Haddii Laga Helo Cudurka](#)

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir COVID-19 Communications Unit 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us.